

Nidaamyada iyo amar-bixinta u degsan ku isticmaalka shabaqada Dowladda hoose ee Växjö

Dhammaan ku isticmaalayasha shabaqada Dowladda hoose ee Växjö, waa in qalabyada warbaahinta casriga (IT) ee dugsiga ugu isticmaalaan qaab xilkasnimmo ku salaysan, iyadoo fiirogaar aan la siinin haddii qofku u adeegsanaayo kombyutar isaga u gaar ah iyo in kale. Nidaam-bulshodeedka waxaa u ah sharciyada dalka Iswiidan ka hirgalay iyo saldhigga anshaxa ee qorsheha waxbarshada. Taasoo macneehada ah in ixtiraam loo muujiyo wada-sinaanshada aadanaha oo idil, lagu isticmaalo af-wanaag iyo la tixgeliyo sharaf-shaqsiyeedka iyo sharafta dadyoowga kale. In qof meel looga dhaco waa arrin aan marna la aqbali karin.

Kombyuutarrada shabaqada ku xiran, marna looma isticmaali karo qaab aan waafaqsanayn sharciyada dalka Iswiidan ka hirgalay, tusaale soo dejisada waxyaalaha ku xafidan copyright, sidaasoo kale in la soo degsado waxyaalaha anshax-xummada ku salaysan ama sharcidarrada ah.

1. Kombyuutarrada iyo shabaqada dugsiga, waxaa loogu talagalay in waxbarashada darteed loo adeegsado. Dhammaan ku isticmaaleyaasha shabaqada dugsiga, waa in ay u dhaqmaan qaab xilkasnimmo ku salaysan oona qalabyada tixgeliyaan.
2. Waa mamnuuc in la adeegsado akawnt ama password u qof kale leeyahay. Waxaad adeegsan karta oo keliya akawntiga iyo passwordiga ee adiga ku gaarka ah. Qof kale marna ma siin kartid warbixin ku saabsan passwordigaaga. Waa inaad mar kasta shabaqada ka baxda markii aad hawlahaaga dhamaysato.
3. Sharciyada dalka Iswiidan ayaa xitaa goobaha Internet ka hirgalay. Waa mamnuuc in qof la gardarasyto, la faraxumeeyo ama meel looga dhaco iyadoo la adeegsanaayo goobaha lagu sheekaysto, email ama forum. Markii aad qof xiriir la yeelanayso waa inaad isticmaasha af-wanaag.
4. Markii aad ku sugan tahay goobaha internet, sida aad doonayso uguma isticmaali kartid barnaamijyada kombyuutarrada, masawirrada iyo muusikada. Laguma oggola inaad soo dejisato oo aad kombyuutarkaaga ku duubato waxyaalaha lagu ciyaaro, barnaamij ama faylal oo aadan xaq u lahayn. Waxyaalaha sharcidarrada lagu helay waa ka mamnuuc kombyuutarrada dugsiga.
5. Waa mamnuuc in wax laga beddelo ama la ciribtiro hab-dhiska kombyuutarrada ama shabaqada.

Haddii aan nidaamyada la tixgelin maxaa dhici doono?

Haddii aadan tixgelin qodobada nidaamyada, waxaa muddo gaaban ama dheer laga mamnuucaya inaad ku isticmaasho kombyuutarrada iyo shabaqada dugsiga.